

HADIMADA GUMAYSIGA NIDAAMKA ISKUULADA[SCHOOLING SYSTEM]

WAA MAXAY NIDAAMKA ISKUULADU [SCHOOLING SYSTEM] ?

Waa qaab gumaysi oo ay soo ikhtiraaceen gumaystayaashii reer yurub ayaga oo raba in ay soo saaraan bulsho la fikir ah ayagana la af ah ama la luuqaaad ah [English] laakiin ay qabsadeen maskaxdooda

Dagaalka ugu adag ee aduunka lagalaa waa dagaalka maskaxda si aad bulsho dhan maskaxdeeda u qabsatidna waa inaad latimaadaa nidaam dhisme oo gumaysi ah.

Aqoon yahano badan ayaa kahadlay hadimooyinkan gumaysi ee iskuulada ama qaabkan waxbarasho ee maanta kolkii u horeysay ee nidaamkan lasamynayay meeshii ugu horaysay ee laga fuliyay waxay ahayd qaarada America sida tariikhda ku cad qaaradan America markii lasoo helayay waxaa kunoolaa oo alle ku uumay dad loo yaqiinay[hunuudil axmar] hindi madmadow ama sida ay soomaalidu utaqaam cali baysteen sidee marka dadkaas dhulkooda looga dhacay waa su aasha ugu muhuumsane

Gumaystihii reer galbeed ama reer yurub waxay yimaadeen dhulkaan ayagoo raba inay aduunka kamamulaan side marka ?

Kowdii horeba waxay soo dajiyeen qorshe jiil dhan lagu af ganbinaayo ayaga oo laga tirtiraayo dadkaas qaab nololeedkii dadkooda ,aragtidoodii iyo aduun aragoodii ayaga oo laga aaminsiiinayo in qofka cadi uu kasarayso kana maskax badan yahay markii laga fakarayay qorshahaas waxaa laysku af gartay in bulshadaas qaabka kaliya ee qorshahaas loogu fulin karo ay tahay hanashada jiilal dhamays tiran si loo qaato jiilalka dhalan doona cimrogooda barkiisa ayaa loo furay iskoolo ay wax ku bartaan si loo soo saaro qof la jaan qaadi karro aduun araga reer galbeedka gumaystaha ah

Marka la eego wadamadeena muslimiinta ah ama wadankeena soomaaliya kolkii uu ogaaday in xeerarkii heshiiseed ee barlin ay qabteen gumaystaha ayuu ka

fakaray qaabkee ayaan u haysan kadhnaa anaga oo aan madax banaani rasmi ah siinaynin waa tii ay boosaskooda ku wareejiyeen ururo ayagu wax bareen oo badala laakiin ay kamaamulaan daaha gadaashiisa waa tii ay halmar fureen albaabka xorriyada ayaga oo kicinaya ururo siyaasadeed ma is waydiisay sababta gumaystihii reer yurub uu halmar uwada baxay muddo ku siman 20 sano 1950-1970 way iska cadahay inuu jiray qorshe fulineed ama kooxo la fikir ah oo ay booskoodii ku AAMINEEN

Mufakir wayn oo la oran jiray H.E. MENKEN ayaa yiri tacliintan taqliidiga ah waxaa loo sameeyay waa in lasoo saaro dad siman maskax ,aragti iyo aduun aragba

Aqoon yahanda soomaaliyeed ee aad uga digay dhagarahan qarsoonaa waxaa kamid ahaa abwaankii waynaa ee HADRAWI maansadiisii daba huwan asaga oo yirri

- Iskuuladu waa dayayn
- damiinimaday dhigaan
- dartay uma soo lug go'in
- duruustu fal bay tiqiim
- xaqbay garba duubayeen
- diintay gibil saarayeen
- waxay dadayeen umuur
- dhibteedu dib iigu tiil

YAA SAMEEYAY NIDAAMKAN ISKUULADA

Yurub waa gii hore dadku waxay uqayb sanaayeen labo qaybbod ama labo dabaqadood oo ah [MADAX] IYO [MIJO] SHAQAALE u shaqeeya madaxdaas_.

Xiligaas kadibna waxaa lagalay xilligii loo yaqiinay [RENAISSANCE]waxaana bilaabay Italy 1400m-1600m waqtigaas ayay samaysmeen dabaqad dhexe oo u badnaa aqoon yahanno

Kadib markii ay dadkii simeen ayay ka hor yimaadeen nidaamyadii maamul ee ay xukumayeen dabaqadii sarre ee madaxda ahayd

Kadib ayaa la iswaydiiyay waa qaabkee qaabka ay bulshadu madaxda ugu hogaansami lahaayeen si hagar la aana looguna shubi karaa kumanaan fikradood oo gumaysi waaana iskuulada hadaf ka laga lahaa waxayna ahayd in la hir galiyo mashruuc la yiraahdo [**INDOCTRINATION**] qaabkan waa qaab dadka wax labarayo si kooxo kooxo ah ama bulsho ah loogana baahan yahay inay aaminaan aaminaado ayaga oo aan ufiirinaynin saxnimadeeda iyo qaladnimadeeda si loo soo saaro bulsho wax soosaarka maadiga ah aad utagaan lakiin aan madax ka fikirin aanan fara galin arimaha dowlada iyo doorashooyinkeeda

Kadib ayaa si fikraddii loo casriyeeyo looguna darro wax lajaan qaadi kara casrigaas aan kasheekaynayno oo loo yaqaan casrigii warshadaha la furay iskuulo loo yaqaanay [**factory model of schools**] iskuuladaas oo soo saarayay qof **fashioned** ah oo aad loogu tababray qaababka looga shaqeeyo warshadaha cidda warshadahaas lehna waa madaxda iyo sameeyayaashood

Kadib markay ku finaay wayday waxsoosaarkii raga ayay soo saareen dumarkii qarnigii 18aad waa dhagar aad uwayn in bulsho dhan ay ushaqaynayso cid gaar ah wxaana sabbay in ay ku dhacaan dabinadaas qarsoon waa iskuulka iyo dhagarihiisa

Bulshadu markii ay dareentay in dowladu qorshe wadato ayaa lais waydiiyay sidee bulshada looga dili karaa dareenadan karaahinimo oo sababi kara kahor imaansho dowladeed markaas kadib ayay soo saareen mashruuc kale oo loo yaqaano hadda **TAABUUR AMA SAFKA ISKUULKA**

Safkaas ardada la tubo subax walba waxay ahayd dantii laga lahaa in ardada maskaxdooda laga dhaadhiciyo taqdiisinta dowladda ardayga asaga oo yar ayaa la xifdi siin jiray heeso kacinay shucuurta ilaa lagu wado muddo 12 sanno ah kaliyatana looga sheekeeyo dhinaca wanaagsan ee dowlada iyo cidda maamulaysa

Sidee marka qof intaas oo sanno lagu shubayay fikardaaas uu uga hor imaan karaa nidaamka

waa wax aan dhici Karin sababtoo ah waxaa lagu daray nolol maalmeedkiisa taqdiisinta iyo waynaynta dowladda waa qorshe hagardaameed oo aad uxun

SIDEE LOO SAMEEYAY QAABKA TAXANAHA AH EE 12KA SANO

1892 ayaa toban nin oo American ubadnaa ay sameeyeen nidaamka aan hadda naqaan ee 12 sanno ah ururkooda waxaa loo yaqaanay [**COMMITTEE OF TEN**] waxay soo kordhiyeena wuxuu ahaa in tirade sanadaha la xadido ayada oo lagu dhigayo iskuulada fikrado gumaysi kuna baxaysa aduunka oo dhan hal luuqad oo ah English

Marka su'aasha is waydiinta mudani waa yay yihiin kooxdani maxaysa u sameeyeen nidaamkan ?

Su aashaash jawaabteeda si aan uhelno waa inaan soo qaadanaa ninkii sameeyay kooxda oo loo yaqaan **wilaum torri** ninkaas fikradiisaas wuxuu ka qoray buug ladhahao [**INDIAN ADICATION**] BUUGAAS fikrada uu kaga hadlayo waa qaababkii dadkii hindida madooweed loo qabsaday loona maamulay buugiisaas wuxuu kaga hadlayaa qaabaka aad taariikhda loo qariyo iyo qaababka ugu tooloon ee bulsho dhamays tiran loo qabsan kadho

Qaabkan 12sano ee xiriirka ahi sida buugaas lagu cadeeyay waa in fikradahaas gumyasi lagu saleeyo waxaa dheeraa mashruuc ganacsi oo halkaas ku dhex jira

QAABKEE UMADA SOOMAALIYEED LOOGU HIRGALIYAY QORSHAHAAS GUMAYSI

Gumaystuhu markii uu umadaha qabsanayay waxa uu ku dadaalay inuu umad walba WAAQACA DHEXDEEDA AH ku maamulo gumaystuhu markuu arkay ummada soomaaliyeed in umadan soomaaliyeed ay ku wayn tahay dhexdooda qabiilku ayuu uyeelay kaabo qabiilayaal qabiil walba hogaamiya oo ayaga ka mushaar qaata kadib markii uu dalka cabaar uu haystay oo dib looga fakaray side si abadi ah wadamadaas loogu qabsan kadhaa ayay adeegsadeen schooling system ka oo ah in ay bulsho walba wax ubaraan jiilalkooda soo socda qaabka ay ayagu rabaan bulshada soomaaliyeed waxay ku yiraahdeen qabiil walbaa

hakeensado 50 wiil oo wax loo baro aakhirkiina waa ragii xorraynta kadib xilalaka loo dhiibay hayayna ilaa kacaankii

Tusaale ; hadii aan hal tusaale idinku tuso cida ay ahaayeen ragaasi baarlamaankii lixdankii lasameeyay waxay ahaayeen ragaas dhamaantood waxay isku raaceen markii la ansixinayay dalka ma kitaabka qur, aankan ku xukunaa mise dimuqraadiyad baarlamaankii oo dhan waqxay u codeeyeen dimuqraadiyad ilaa labo nin ma ahane waa kee qofka kacdoon ku sameeyay gumayste uu nacay markuu ka tagayna is ticmaalay qaab maamulkiisii way iska cadahay qorshahaasi

Kee badan faaiidadiisa iyo khasaarihiisa

Marka lajoogo majaalka wax barasho meesha ugu wqanaagsan ee laga fiirin karo waa waqtiga meeqo waqti ah ayaa wax barashada galay

- dhamaan aradayga soomaaliyeed 12 sanno wuxuu kalaas fariistaa oo si sax ah lecture u qaataa muddo dhan 8 bilood iyo afar saacdood

- maalintii waxaan wax baranaa 4 saac iyo badh

- bishiina ardayga soomaaliyeed wuxuu wax bartaa 21 cesho oo noqomayda 21*4 saac iyo badh bishiina waa 94 saac oo u dhiganta 4 maalin

- sanadkiina waa 12 bilood lakkin aradayga soomaaliyeed sanadkiisu waa sided bilood oo saacad ahaan noqonaysa 756 saac oo u dhigmaysa 30 maalin

- 12 sano waxaan wax baranaa saacad ahaan 6,048 saac oo u dhigmaysa 252 maalmood

12 sano waxaan wax baranay si sax ah wax kayar hal sanno hadaba aaway 11 sano ee dhiman dhab ahaantii way khasaadhay

Nidaamkan wax barasho ee gumaysiga cad ah waxaa dajisay unicef waana dhagar wayn

Bal aan fiirino waxa lagu dhex barto nidaamka

1. Gabi haanba lagu bari mayo wax cimi dhmaystiran ama laguma siinayo wax xog dhamays tiran waa qayb kamida gumaysiga
2. Laguma barayo wax xirfad ah ee waa aragtiyo dhamaan kor kaxaadis ah
3. Noloshu waa hal wado ayaa ardayda loo sheegaa si aysan wadooyin badan u tijaabin
4. Manhajku waa mid ku habaabinayo laguma dhiso wax qiyam ah ama akhlaaq ah
5. Waxaa manhajka ku jira dhamaankii wax yaabihii u gaarka haa raga iyo wixii u gaar ahaa dumarka ayada oo looga sheekaynayo si cad sidaasoo kalle maxay tahay sababta fasalka rag iyo dumar looga dhigay
6. Dhamaan macluumaadkan ma korinayaan garaadka ee waa kuwa ku daalinaya garaadka xifdin dheer
7. Taariikhdu dhamaan waa mid marin abaabin u badan oo ku samaabsan reer yurub iyo guulahoodii iyo dagaaladoodii.

dhamaad